Talooyinka Xisaabta ah

1. **Ku cel celiya tirinta**. Halkii aad ka isticmaali lahayd tirinta caadiga ah ee 1, 2, 3, waxaad u tirin kartaan tiro dhaaf (sida 2, 4, 6, 8 ama 10, 20, 30 oo kale.)
2. **Dhab ka dhig.** Marka aad muujineysaan tirada isticmaala waxyaalaha caadiga ah ee guriga yaala (sida lacagta, baastada, badhmada dharka/guluusyada iyo wixii la mid ah.)
3. **Ku cel celiya akhrinta, qoritaanka iyo isku xigxigsiinta lambarada**. Ka raadi lambarada daabacan/qoran (joornaalada, buugaagta ama internetka) oo kor isula akhriya, isbarbar dhiga, oo u qora sida ay lambaradaasi u kale yaryihiin ama sida ay u kala weyn yihiin.
4. **Lacag!** Caruurta yar yar bar in ay kala aqoonsadaan lacagta iyo in ay bartaan sida loo tiriyo, marka ay yara waynaadaana iyaga u dhiib in ay lacagta bixiyaan marka aad wax iibsanaysaan. Isla ciyaara ciyaaro ku saabsan barashada lacagta. Caruurta yara waawayna ka dhig maqal hayaha/lacag hayaha.
5. **Ka shaqeeya xisaabta ku saabsan waxyaabaha xaqiiqada ah**. In ay ilmuhu bartaan waxyaabaha xaqiiqada ku salaysani waxay ilmaha bartaa in ay xaliyaan mas'alada xisaabta iyagoo fahamsan u jeedadeeda halkii ay ka shaqeyn lahaayeen iyagoon fahmin.
6. **Kala saara oo kala qaybiya waxyaabaha**. Isla Raadiya sida ay waxyaabaha qaar isu raacaan. In la fahmo sida wax isu raacaani waxay ay sahashaa in la fahmo sida loo xaliyo xisaabta.
7. **Isla kariya ama isla duba cunto**. Karinta iyo dubitaanku cuntadu waxay u baahan yihiin in la cabiro qiyaasta waxa la karinayo, kulayla iyo wakhtiga ay qaadato in cuntadu karsanto.
8. **Ciyaaro isla ciyaara.** Ciyaaraha waxaa ka buuxa xalinta xisaabaadka. Ciyaarista gaymku waxay u baahan tahay in qofku isticmaalo maskaxda, waxna qorsheeyo, ama ka fikiro suurta galnimada waxyaabaha dhici kara.
9. **Isla aqoonsada shaxanada joomateriga.** Islkala raadiya shaxannada laga heli karo deegaanka. Isku daya in aad dib u samaysaan shaxanada kala duwan idinka oo isticmaalayo waraaqo ama waxyaabaha kale ee guriga laga heli karo.
10. **Teknoolajiyada iyo xisaabta.** U isticmaal teknoolajiyada ujeedo waxbarasho. Waxaa jira barnaamijyo badan oo Xisaabta u gaar ah.

St. Cloud Area School District 742!
Prepare. Engage. Educate. Empower. Inspire.

Talooyinka Waalidka

"Waaalid ahaan waxa ugu muhiimsan ee an ilmaheena u qaban karnaa waa in aan wax u akhrino marar badan inta ay yaryihiin. Akhrisku waa dariiqa loo maro guusha dhanka iskuulka iyo noloshaba. Marka ay caruurtu barato in ay jeclaadaan buugaagta, waxa ay bartaan in ay jeclaadaan waxbarashada."

Laura Bush

"Sida keli ah ee lagu baran karo xisaabtu waxa weeyaan oo keli ah in xisaab laga shaqeeyo."

Paul Halmos

Waxaa kafaalo qaaday Title I
Patricia King
Isuduwaha Barnaamijka Title I

St. Cloud Area School District 742!
Prepare. Engage. Educate. Empower. Inspire.

Talooyinka Wax Aqrinta ah

1. **Akhriya, akhriya, akhriya!** Cod kor ah wax ugu akhri ilmahaaga xataa marka ay yaryihiin, una akhri marar badan. U bilow wax u arkhrinta inta ay aad u yaryihiin, una wad inta ay kasii weynaanayaan. Sidaas ma kordhineyso oo keliya eraya ay yaqaanaan, balse waxay xitaa dhiseysaa jaceyl ayu qabaan wax aqriska.
2. **Kadhigta akhrinta mid muhiim idiin ah.** Maalin kasta waqti ka mid ah wax aqri . Marka aad adigu wax akhrido, waxa aad tusaysaa ilmahaaga in wax akhrisku qiimo kuu leedahay. Wax akhris ku darsada waxyaabaha aad samaysaan marka aad sii seexanaysaan. Caruurta waa weyn wax ha arkhriyaan marka ay sii seexanayaan si ay ugu raaxaystaan.
3. **Ciyaara ciyaaro erayada ku saabsan.** U sheeg hal eray ilmahaaga oo waydii in ay kuu sheegaan eray kale oo ay isku dhawaaq yihiin, isla sameeya barashada erayada isku macnaha ah iyo kuwa iska soo horjeeda. Isla ciyaara ciyaaraha SCRABBLE, BANANAGRAMS, ama HANGMAN. Ciyaara ciyaaro ku saabsan xarafyada alif beetada sida in aad xuruuftaa oo dhan ka raadisaan calaamadaha wadooyinka ku dhegan.
4. **Doorta buugaag aad akhridaan oo idinku haboon.** Haddii ilmahaagu iskood u akhriyayaan buugaag, hubi in ayna buugtaasi aad ugu adkayn. Waydii in ay hal bog kor u akhriyaan. Hadii ay sameeyaan wax ka badan 5 khalad inta ay bogaas akhriyayaan macneheedu waa buugaasi wuu ku adagyahay. Buugaasina waa mid ku haboon in aad isla akhridaan!
5. **Hubi fahmintaaka.** Ilmahaaga waydii su'aalo ku saabsan sheekada, si aad u hubiso in ilmahaagu sheekada fahmay. Waydii in ilmahaagu kuu sheego sababta, si ilmahaagu kuugu sharaxo sida ay wax u malaynayaan. Isla saadaaliya sida wax u dhici doonaan sheekooyinka. Marka aad sii akhridaana isla hubiya in saadashiinii ay saxsanayd.

"Markasta oo ay wax akhrintaadu sii badato, waxaa iyadana sii badata waxyaabaha aad taqaano. Markasta oo ay sii badato waxbarashadaadu, waxaa sii badata meelaha aad gaadho."

Dr. Seuss

6. **Ka wada hadla waxa aad akhriyaysaani waxa uu ku saabsanyahay.**
   -Maxaad ka jeclaatay sheekada ama maxaad ka necbaatay? Sababtu maxya tahay?
   -Waa kee jilaaga aad ugu jeceshahay ee sheekada? Sababtu maxay tahay?
   -Hadii aad adigu sheekadan qori lahayd maxaad ka ... (bedeli lahayd, ama maxaad si kale u dhigi lahayd)?

7. **Dib isugu sheega sheekada.** Marka aad sheekada akhridaan kadib waydii in ilmahaagu dib kuu sheegaan sheekada wixii dhacay
8. **Ku shaqeeya erayada.** Bar ilmahaaga xeeladaha ay ku aqoonsan karaan ama ku barankaraan erayada ku cusub.
   -U kala qaybi erayga gaybo yar yar
   -isticmaal sawir ay xasuusan karaan ama kusoo qaban karaan erayga
   - Waydii in ay kuu sheegaan waxa macnaha sameeya ee jumlada/hadalka
   - isticmaal calaamado lagu soo qaban karo macnaha si loo fahmo macnaha
   -Ka bood erayada aad garan waydo oo mar danbe u soo laabo
   -Ku laabo biloowga jumlada/hadalka
   -Ku celi celiya erayada lagu garto aragtida (erayada markasta loo isticmaalo qoraalka)
9. **Isticmaalka teknoolajiyada iyo Wax akhriska.** U isticmaal teknoolajiyada hab wax barasho, waxaa jira barnaamijyo kala duwan oo loogu talagalay barashada akhriska.
10. **Ka dhig madadaalo!** Iska nasnasiya akhrinta, isla jila sheekooyinka, isticmaal muujinta dareenka. Ku ciyaara erayada, wax kasta oo aad adigu ku madadaalato ilmahana waxay u noqoneysaa wax uu ku madadaasho.